

**Xeerka Maamuleed, ee 15 Febraayo 1960, lamba. 33 diiw.**

**Wax-ka-beddelka xeer lamba. 609908, ee 2 Setember 1959 oo la xiriira furidda aagga demaaniyaha dhisidda (guryaha).**

## **WASAARADDA MAALIYADDA (LACAGTA)**

### **WASIIRKA**

Markuu arkay sharciga Jamhuuriyadda Talyaaniga, ee 4 Noofember 1951, lamba. 1301, - oo ansixinata awood fulinna siinaya Mucaahadada Wasaayada xagga Dhulka Soomaaliya;

Markuu arkay sharciga 7 Maajo 1956, lamba. 1: “Dhismaha Xukuumadda Soomaaliya”;

Markuu garwaaqsaday in, xagga saameynta Amargooyada lamba. 5, ee 12 Abiriil 1950, ay yihiin kuwo la dabbaqi karo, mar haddii ay la socon karaan qodobka 14aad, ee Mucaahadada Wasaayada, axkaamta nidaamisa bixinta ruqsadaha dhismeed oo ku jira Xeerka Nidaamka Dhulka, ee Eritereeya, oo lagu ansixiyey XB (XEER Boqortooyo), ee 7 Febraayo 1926, lamba. 269, oo Soomaaliya loogu fidiyey xb, ee 17 Maarso 1938, lamba. 380;

Markuu arkay Xeer Wasiireed lamba. 609908, ee brot., taariikh 22 Juunyo 1959, si khalad ah loogu nashriyey Faafinta Rasmiga, ee Soomaaliya, Raac, lamba. 3 ilaa lamba. 9, ee 15 Setembere 1959;

Markuu tixgeliyey in, bedka aagga la furay, ee ku xusan xeerka horey loo soo xigtay, si khalad ah loogu dhex tilmaamay góaanka mq. 225 halkii lagu tilmaami lahaa 344, sida ku cad naqshadda ku lifaaqan xeerka la soo sheegay, ee lr. 609908, ee borot., taariikh 22 Juunyo 1959;

## **WUXUU XEERINAYAA**

Bedka aagga la furay, ee ku xusan Xeerka Wasiireed, furitaanka (fasaxa) lamba. 609908, ee borot., taariikh 22 Juunyo 1959 waa in loo qaato 344 mq.

Muqdisho, 15 Febraayo 1960.

### **WASIIRKA**

**Cusmaan Axmed Rooble**

Markuu arkay, Diwaangeliyeyna- diw. lamba. 21,  
xaashi lamba. 40.

Muqdisho, 20<sup>ka</sup> Maarso 1960.

Hanti-dhowraha: **Spadaro**